

TIJAABADA QIICA EE BULAACADDA OO BILAABANEYSA

Shaqaalaha magaaladu ayaa diyaarinaya tijaabada qiica ee bulaacadaha ee xaafadda aad degan tahay. Shaqaalaha qiic aan sun aheyn ayey ku sii deynayaan bulaacadda, iyada oo qiica lagu ogaanayo dilaaca, goobaha jaban, iyo meelaha biraha isku xiran ay kala furmeen.

Goobaha jaban ama biraha kala furtay waxaa ka soo galaya biyaha roobka oo raacaya bulaacadda, taasoo keeni karta fatahaad. Helitaanka iyo hagaajinta (xiritaanka) goobaha jaban waxa ay caawineysaa in ay yareyso fatahaadda dhici karta. Sidoo kale, yareynta biyaha roobka ee raaca bulaacadda waxa ay yareyneysaa nadiifinta bulaacadaha, taasoo lacag badan baajineysa.

magaaldu waxa ay ku talo jirtaa in ay isticmaasho qalabka (drones) meesha og laga hago si loo ilaaliyo nabadjelyada shaqaalaha iyo waqtiga mulkiilayaasha ee tijaabada qiica ee sanadkan.

Qalabkaas (drones) waxa uu dul marayaan dusha sare isaga oo u eegaya looto looto. Duuliyaha qalabka ayaa maamulaya qalabka oo ka ilaalinaya dadweynaha isaga oo ilaalinaya xuquuqda mulkiilayaasha. Qalabkan waxa uu ka qadayaan sawir marwaxadaha iyo dusha sare ee guryaha. Sawirada waxaa loogu talo galay in meelo biyo keydka ah ee gurigu ay ku jiraan biyo ku filan tubooyinka si wanaagsan loo xiray.

Qalabka waxaa maamulaya qof aqoon u leh oo raacaya sharchiyada Waaxda Maamulka Duulimaadka Hawada (FAA) ee qalabka duula ee ganacsiga.



GURIGAAGA U DIYAARI TIJAABADA

Waxaa laga yaabaa in qiicu gurigaaga ka soo galo meelo dhulka ka daloola ama suuliyada ama qubeyska aan la isticmaalin. Inkasta oo dhamaan meelaha biyaha ka baxaan leeyihii biyo fadhi ka celiya in qiicu guriga soo galo, waxaa suurogal ah in dhulka hoose ama garaashka ay qaleyl noqdaan. Hubi in meel kasta oo biyo fariisi loogu talo galay biyo ku jiraan si ay uga hortagaan tagaan in qiicu soo galo (sida godka musqulaha oo kale) Caag biyo ah ku shub godka dabaqa hoose ee guriga (basement), godka musqusha, waji dhaqa, godka qubeyska ee aan la isticmaalin muddo bil ah.

Dhismayaasha qaarkood waxa ay leeyihii dabaqa hoose e eguriga oo dadka dhan dharka ku dhaqdaan ama wax ku keydsadaan. Haddii aad degan tahay dhisme qolal badan ka kooban, caag biyo ah ku shub dhulka qolka dharka lagu dhaqdo ama god biyuhu ka baxaan ee dhulka hoose.

Qiicu sun ma aha

Qiica loo isticmaalo tijaabada sun ma aha mana ah mid daahyada iyo dharka ku dhagaya. Hase yeeshay, waxaa suurogal ah n qiicu dadka qaar uu qufac ku keeno sida uu qaba xanuunada sambabada ama xayawaanka dad la joogta ah. Magaaladu waxa ay ku talineysaa in dadka qaba xanuunada noocan ah ka fogaadaan inta ay socoto tijaabada.

Soo wac 612-673-3254 ama 311 ama fariin qoraal ah u soo dir 612-490-8627 si fariin gaar ah laguugu soo diro. Adiga ama qof kale oo qoyskaaga ka tirsan ay ku adag tahay dhaqdhaqaaqa, qabo cudurada neefiga, ama jiraan xaalado caafimaad oo ka sii daraya haddii uu qiicu gaaro.

Wac 911 haddii aadan hubin in qiicu la xiriiro tijaabada ay Magaaladu sameynyeoso.